

IIB MA GALO

FAAFINTA

RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad

Muqdisho 29 Maarso 1980 — L. 2 R 3

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin Inmbar walba **RUKUNKA :** Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — djbedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qorjtaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wàsàaraddà Lâcagta.

K O O B N I I N

Q A Y B T A K O O W A A D

S H A R C I

SHARCI L. 8 ee 3 Feb. 1980, waxaa la meel ma-Boga 357
riyey Dacwadaha ku saabsan Kirada Guryaha.

SHARCI L. 9 ee 18 Mar. 1980 Toosin iyo wax ka » 358
baddelid Sharciga horumarinta Iskaashatoo-
yinka ee L. 40 soona baxay 4.10.1973

Q A Y B T A L A B A A D

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 46 ee 23 Maar. » 360
1980 Cafis doonta Maxkamadda Badbaadada
ka Hantiguurisay Jaalle Cabdulcasiis Yaxye
Al-Kidi oo Cumaan ah

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 47 ee 2 Maarso » 361
1980, Magacaabid Maareeye Guud ee Mash-
ruuca Gaanaha Banaadir

QABTA KOOWAAD
SHARCI

SHARCI L. 8 ee 3 Feb 80, Waxaa la meel mariyey Dacwadaha ku saabsan Kirada Guryaha.

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. yahay 38 ee 5.4.1972.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. yahay 5 soona baxay 16.8.76 iyo beddelaaddii ka dambeesay.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. yahay 44 soona baxay 27.11.73 ee ku saabsanaa kirada guryaha.

ASAGOO TIXGELIYAY: Taladii uu soo jeediyey Guddiga Caddaaladda.

ASAGOO TIXGELIYAY: Dhibaataada ka taagan Kirada Guryaha ee Magaala Madaxda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

- 1) Waxaa la meel mariyey in dacwadaha ku saabsan kirada guryaha baaristooda iyo go'aan ka gaaristooda lagu wareejiyo Guddiga Caddaaladda dibna loogu celiyo Guddiyada degmooyinka.
- 2) Go'aannada Guddiga degmooyinka waa kama dambeys wax raacfaan ah oo Guddiga Caddaaladda looga qaadan karaana ma jirtaan.
- 3) Go'aannada Guddiga degmooyinka kadib marka ay dhaqan galaan waa in si deg deg ah loo fuliyaa.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho 3 Feb 1980

SHARCIGA L. 9 ee 18 Maarso 80 Toosin iyo wax ka baddalid
Sharciiga Horumarinta Iskaashatooyinka ee L. 40 soona baxay 4.10.1973

ISAGOO ARKAY: Qodobada 41,111 iyo 113 ee Dastuurka J.D.S

ISAGOO ARKAY: Sharciyada L. 17,18,iyo 19 ee 1,7.76

ISAGOO ARKAY: Sharciiga lagu dhisay Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

ISAGOO AQOONSAN: Iney tahay lagama maarmaan in wax laga bedelo Sharciiga Horumarinta Iskaashatooyinka Soomaaliyeed oo loo xilsaaray Ururinta iyo maamulidda Iskaashatooyinka Dalka oo dhan.

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciiga soo socda.

Qodobka 1aad

1. Ayadoo Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed xil uga saaran yahay inuu kulmiyo, Ururiyo, maamulana dhammaan Iskaashatooyinka dalka waxaa awooddii Wasaaradaha ay ku ulahaayeen Iskaashatooyinka ee ku tilmaaman sharciiga 40aad ee soo baxay 4.10.1973. lagu wareejiyey UDHIS.
2. Sidaas daraadeed wixii qalab, farsamo iyo shaqaalaba ee la xiriira Iskaashatooyinka ee hoos imaanayey Wasaaradda, waxaa lagu wareejiyey Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed wuxuu awood u leeyahay inuu si toos ah uu u dhoofiyo xoolaha iyo badeecadda ay soo saaraan Iskaashatooyinka isagoo la kaa-shanaya Hey'adaha Dowladda ee ku shaqada leh ganacsiga iyo dhoofinta badeecadda

Qodobka 3aad

Waxaa la tirtiray Qodobada sharciga horumarinta Iskaashatooyinka ee ka horyimaada sharciga lagu dhisay UDHIS iyo sharcigaan.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho 18 Maarso 1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.